Sidee loo helaa
FIKRAD GANACSI?

Saciid Cali Shire



In kastoo, dadka badidiisu aysan sii horummarin ama meeshaba ka qaadin, haddana, waa yar yahay, ama waxaaba la oran karaa maba jiro, qof aan mar uun maskaxdiisa firkad ganacsi ku soo dhicin.

Dadka qaarkiis, fikraddu waxay ku soo dhacdaa iyagoo hurdo isu diyaarinaya, qaar iyagoo TV daawanaya, qaarna iyagoo buug ama jaraa'id akhrinaya. Meesha kuwo fikraddoodu salka ku hayso ceebo ay kala kulmeen badeecad ama adeeg ay dhowaan isticmaaleen, kuwo xal u raadinayeen cabashooyin ay ka maqleen qaar ka mid ah ehelkooda ama saaxiibbadood, kuwo fikradu ku dhalatay ka dib markii bannaanka la dhigay oo ay shaqo la'aan noqdeen, kuwona fikradda kala soo dhex baxeen sheeko qof u sheegay, buug ay akhriyeen ama xayaysiin derbi surnayd, kuwo fikradu waxay ku soo dhacday iyagoo safar ah ama dalxiis tamashlaynaya.

Dadka badidiisu, si kastoo fikraddoodu u qurux badan tahay, haddana kuma dhiirradaan ka miro dhalinta fikraddaas. Ku dhiirasho la'aantaasi mar-mar waxay salka ku haysaa kalsooni darro, mar-mar waxay naftooda ku qanciyaan in aysan heli karan maalka iyo maskaxda fikraddaas dhulka ka kicin kara, mar-marna waxay waayaan cid ay la garabsadaan. Qaar kalena siday u rog-rogayaan ayay ka daalaan oo iska tuuraan.

Dhowrka qof ee dhexda u xirta siday fikraddooda bannaanka u soo dhigi lahaayeen laftigoodu waxay la kulmaan caqabado aan la soo koobi karin.

Haddaba aan is waydiinee, sidee loo helaa fikrad ganacs? Ma jiraan waddooyin la qaado marka la baadi goobayo fikrad mirodhal noqota? Mase jiraan waxyaabo ka qayb qaata qurxinta, qaabaynta iyo soo bandhigista fikrad ganacsi. Qoraalkan kooban, oo laga soo diyaariyey buugga 'Furaha Ganacsiga', ayaa isku dayaya in uu jawaab u raadiyo is waydiimahaas iyo kuwa kale oo ay dhici karto in ay dad badan maskaxdooda ku soo dhacaan.

Hilinka fikrad ganacsi oo dhaxal gal ah

Dad badan ayaa ku tegey in fikrad meel mar noqota ay curin karaan oo kaliya dad yar oo leh aqoon iyo waaya'aragnimo gaammurtay. Qaar kale waxay naftooda ka dhaadhiciyeen in fikradaha fiican oo meel marka noqon kara ku gaar yihiin ama khasnad ugu xiran yihiin dadka dhaqaalaha haysta oo kaliya. In kastoo dareenka dadkaasi ka soo qaad leeyahay, wax badanina ka run yahay, haddana, qof kasta waa curin karaa fikrad ganacsi oo meel mar noqota. Waxaaba la yiraahdaa, qaar badan oo ka mid ah ganacsiyada ugu koboca iyo faa'iidada badan adduunka waxaa curiyey dad aan dhaqaale, waaya'aragnimo iyo

> *Qof kastaa waa curin karaa fikrad ganacsi. Waxaaba la yiraahdaa qaar ka mid ah ganacsiyada ugu koboca iyo faa'iidada badan waxaa curiyey dad aan aqoon iyo waaya'aragnimo ganacsti middoodna lahayn.*



aqoon sii durugsan midna lahayn.

Sida uu soo guuriyo Shire (2008), waxa ugu muhiimsan ee fikradaha ka dhiga kuwo meel mar ah waa hilinka la mariyo marka la horumarinayo fikraddaas. Sida wax kasta u maraan hilin ayaa fikraduhuna u maraan hilin. Hilinku waa dhabbaha fikradda lagu qaabeeyo, dhinacyo badan nal loogaga ifiyo, laguna toos-toosiya ilaa fikraddu noqoto mid la maalgelin karo. Hilinka oo la dedejiyo ama la dhinac maro waxaa ka dhasha indho beel horseeda ceeb, khasaare iyo waqti lumis. Hilinku wuxuu leeyahay bar bilow iyo bar dhammaad: wuxuu ka bilaabmaa in la baadigoobo fikrad, wuxuuna ku dhammaadaa in la qorsheeyo sidii loo hirgelin lahaa fikraddaas. Soo bandhigista, qiimaynta iyo xulashaduna waa tallaabada labaad iyo saddexaad. Sidoo kale, hilinkaasi, waa mid tallaabo-tallaabo ah.

Tallaabada 1aad – baadigoobista iyo qaabaynta fikradda

Xaggee fikradaha cusubi ka yimaadaan? Ma sidii Niyuuton ayaa geed tufaax ah la hoos faristaa si tufaax madaxa kaaga dhaco, oo markaas fikrado cusubi kuugu soo daataan, mise waxaa jira siyaabo kale oo lagu curin karo fikrado cusub?

Sida Drucker (1988), Shaver iyo Scott (1991) iyo Ardichvili et al. (2003) ku doodaan, fikradda waxaa lagu helaa dadaal ku talo gal ah, ama baadigoob. Nasiib darro, dadka oo dhammi baadigoob buuxa ma samayn karaan. Dadka baadigoobka ku hela fikradaha ganacsigu waa kuwo har iyo habeen isha marinaya suuqa (scanning). Dadkaasi waa kuwo aqoon u leh suuqa iyo qaabka baahida suuqaas lagu dabooli karo. Waxay sidoo kale si fiican uga dheregsan yihiin dhibaatooyinka haysta macaamiisha. Sidoo kale dadkaasi waa kuwo dhiifoon, wax kasta oo ay arkaanna wax iska waydiiya. Ugu danbayn dadkaasi waxay ka tirsan yihiin shabakado (network) fara badan.

Waxyaabaha dadkaasi ka faa'iidaystaan, amaba ay ka lug bilaabaan, markay baadigoobayaan fikraddo waxaa ka mid ah: waaya'aragnimadooda, waxay xiiseeyaan (hobbies), xirafaddooda, iyo shabakadaha ay ka tirsan yihiin.

Tuulalka dadkaasi isticmaalaan waxaa ugu muhiimsan su'aalo is waydiin (asking questions). Waydiintu iyadoo dhinacyo cusub toosh kaga ifinaysa mushkilada, ayay soo bandhigtaa macluumaad cusub oo la xiriira muskhiladda. Macluumaadkaas ayaana soo bandhiga hummaagga fikradda cusub. Sidoo kale, dadkaasi wixii madaxooda ku soo dhaca markiiba lama boodaan ee waxay ka fiiriyaan dhinacyo badan, ururiyaanna xog badan oo wax ku ool ah.

Tallaabada 2aad: soo bandhigista firkado cusub

Meesha tallaabada 1aad la qeexo dhibaatada, dhinacyo badan laga fiiriyo, macluumaad badanna la ururiyo, tallaabada labaad waxaa la soo bandhigaa fikrado xallin kara dhibaatada. Wejigaan waxaa si aad ah looga shaqaysiiyaa maskaxda. Si maskaxda looga shaqaysiiyona, waa in: aan lagu qancin fikradda u horraysa ee qofka kusoo dhacda, waayo fikrado badan oo ka fiican ayaa la curin karaa. Sidoo kale, waa in la badiyo tirada fikradaha (Quantity breads quality,) nooc kasta oo fikraddo ahna la soo bandhigo (The wilder the ideas, the better).

In kastoo dadka qaarba si maskaxda uga shaqaysiiyo, haddana waxaa jira habab dhowr ah oo aad loo isticmaalo. Hababkaas waxaa ka mid ah: in baaritaan lagu sameeyo dhibta xalka loo raadinayo; in fikrado horey u jirey la isku keeno si looga soo dhex saaro xal lagu dabooli karo dhibaatada; in maskaxda laga shaqaysiiyo; iyo in loo fekero si cusub oo aan horay loogu fekerin.

Tallaabada 3aad: qiimaynta iyo xulashada

Haddii qofku si sax ah u isticmaalo 'maskax-ka-shaqaysiyaalkii' aan sare ku soo xusnay, wuxuu soo bandhigi karaa fikrddo aad u fara badan. Dhinaca kale haddii laga fiiriyona, waaya'aragnimadu waxay na bartay in fikrad kasta aysan lahayn fursad maalgelin. Haddaba, su'aashu waxay tahay sidee lagu kala xushaa? Shaandho noocee ah ama miisaan noocee ah ayaase la isticmaalaa si loo kala sooco fikradahaas? Sidee lagu ogaanayaa in fikraddu mustaqbal fiican leedahay iyo inkale?

Su'aalaha kale ee muhiimka ah oo loo baahan yahay in bilowga horeba shaaca laga qaado waxaa ka mid ah: ma jirtaa cid baahi u qabta fikradda? Fikradduse ma tahay mid la hirgelin karo? Tartamayaashuse maxay yeeli doonaan?

Tallaabadani ma samayso shaandho ama miisaan lagu kala sooco fikradaha oo keliya, ee waxay sidoo

kale fiirisaa in fikraddaada iyo himilooyinkaaga qofeed, xirfaddaada, iyo u dulqaadashadaada khatartu is waafaqsan yihiin.

Tallaabadani waxay ka kooban tahay laba weji. Wejiga hore waxaa fikradaha la mariyaa shaandho guud oo meesha ka saarta fikradaha aan mudnayn in waqti lagu lumiyo. Wejiga labaadna waxaa la isticmaalaa shaandho ka indho-yaryar shaandhadii hore si hal fikrad ama laba kaliya u soo haraan.

Aaladaha aadka loo isticmaalo waxaa ka mid ah 'criteria grid', 'flow chart', 'weighted cretieria grid', 'idea compatibility matrix', ' decision balance sheet', iyo kuwo kale oo fara badan. Waxaa sidoo kale jira laba miisaan oo midna la xiriiro ganacsiga, midna la xiriiro qofka. Meesha miisaanka ganacsigu is waydiiyo in suuq diyaar ah oo ku habboon fikradda uu jiro iyo in kale, miisaanka qofeed wuxuu fiiriyaa in qofku ka bixi karo ganacsigaas iyo inkale.

Talaabada 4aad: Qorshaynta iyo hirgelinta

Ahmiyadda ka danbaysa tallaabadani waa sidii sare loogu qaadi lahaa jaaniska fikraddii la xushay loogu beddeli karo fursad shaqaynaysa. Si fikrad loogu beddelo fursad shaqaynaysa waa in la bayaamiyo xalna loo raadiyo carqaladaha ama darbiyada ka hor imaan kara fikraddaas. Darbiyadaasi waxay noqon karaan debinno ay kuu dhiggeen tartamayaashu.waxay sidoo kale noqon karaan kuwo ka dhashay xirfad yari, dhaqaale yari, iwm. In la ogaado, xalna loo raadiyo debinnadaasi waxay qofka ka badbaadiyaan dhibaatooyinka soo wajihi kara mar danbe oo qofka ku keeni kara niyad jab iyo khasaare waqti iyo maal.


Sidoo kale, waxaa la yiraahdaa fikrad aan la hirgelin wax qiimo ah kuma fadhido. In fikrad si fiican loo hirgeliyaana waa waxa ganacasadaha carbisan ka sooca kuwa dani-badayda ah.

Waxyaabaha sare u qaada jaaniska guusha waxaa ugu horeeya uguna muhiimsan in la sii sawirto dhibaatooyinka ka hor imaan kara hirgelinta. Dhibaatooyinkaas waxaa loogu yeeraa carqalado (blockers). Carqaladahaasi waxay noqon karaan kuwo qofka la xiriira, kuwo tartamayaasha ka imaanaya, kuwo badeecada ama adeega la xiriira iyo kuwo guud.

Gaagabo

Haddaan soo ururino waxaan leennahay: (1) qof kasta waa curin karaa fikrad cusub oo miro dhal noqota; (2) si fikradi u noqoto mid taabbogasha waa in la mariyo hilin (process); (3) hilinku waa shaandhada lagu kala saaro fikradda mirodhalka noqota iyo midda aan meel gaarin; (4) waaya'aragnimada, aqoonta iyo shabakadaha qofku ka mid yahay waxay sahlaan in qofku arki karo ama curin karo fikrad taabbogal noqota.

Saciid Cali Shire



Buuggaan, oo muuqaal fiican ka bixinaya bilaabista, kobcinta iyo badbaadinta ganacsiga, ku qoran af-Soomaali, una qoran qaab cilmiyaysan wuxuu:

- Muuqaal fiican kaa siinayaa: sida loo helo fikrad ganacsi, loo horumariyo, looguna beddelo ganacsi shaqaynaya;
- Si fiican kaaga haqab tirayaa sidaad ku xulan lahayd ganacsi samayn kara koboc iyo faa'iido fiican, iskana caabbin kara tartanka;
- Tallaabo-tallaabo kuu tusayaa sidaad u samayn lahayd: qorshe ganacsi, qorshe suuqgeyn, qorshe maaliyadeed iyo qaabfeker istaraatiiji ah;
- Daawo u raadinayaa waxyaabaha ganacsatada Soomaalidu ku liitaan sida: istaraatiijiyadda, maaliyadda, suuqgeynta iyo tartanka.

Buuggaan oo ku salaysan cilmibaaris socotay muddo dheer, aqoon iyo waaya'aragnimo, waa mid heerkasta oo aad kaga jirto ganacsiga, kugu kordhinaya aqoon, ganacsigaagana ka dhigaya mid ka dhex muuqda sayladaha ganacsiga.

Bugga Furaha Ganacsiga waxaad ka heli kartaa:

Buuh Consulting LTD
t. 07838236171
e. saidshire@buuh.net
w. www.buuh.net